# QIIMEYNTA WAX-KA-QABASHADA DHIBAATOOYINKA BANI'AADANNIMO EE SOOMAALIYA



IAHE

GPPi | RAAGSAN



## QIIMEYNTAN MAXAY KU SAABSANAYD?

Intii u dhexaysay 2021 ilaa 2023 Soomaaliya waxay wajahday abaartii ugu darnayd muddo 40 sano ah. Dad badan ayaa u dhibaatooday biyo iyo cunto la'aan, macluushuna waxay khatar gelisay malaayiin qof. Si taasi wax looga qabto, sannadkii 2022 Qaramada Midoobay waxay maalgelinta gargaarka bani'aadannimo ku bixisay $2.3 bilyan. Qiimeyntan waxaa diiradda lagu saaray sida kaalmadaas ay wax-ku-ool u ahayd iyo wixii laga hagaajin karay. Qiimeyntu waxay ka koobanayd 150 waraysi oo lala yeeshay shaqaalaha gargaarka adduunka iyo kuwa Soomaaliya ku sugan, iyo latashiyo lala sameeyay 381 qof oo ay saamaysay dhibaatada bani'aadannimo ee Soomaaliya.

Qiimaynta waxaa laga sameeyay 12 degmo oo ku kala yaalla Soomaaliya iyo Soomaalilaan, oo isugu jira degaannada ay abaartii ugu dambaysay aad u saamaysay iyo kuwa saamayntu ay ku yarayd. Degmooyinkaas waxaa ka mid ah Buurhakaba, Burtinle, Hobyo, Afmadow, Waajid, Balcad, Baydhabo, Hargaysa, Muqdisho, Xuddur, Laascaanood, iyo Burco. Cilmibaarayaashu waxay sidoo kale dib-u-eegis ku sameeyeen dukumiintiyo iyo xogo. Natiijada qiimaynta waa laga dooday, lana sii hagaajiyay iyada oo la adeegsanayo kulamo aqoon-iswaydaarsi ah oo lala yeeshay kooxaha gargaarka ka shaqeeya oo ku sugan Muqdisho iyo adduunka kalaba.

## WAA MAXAY NATIIJADA QIIMAYNTU?

Gargaarka bani'aadannimo ee isugu jiray raashin, biyo iyo daweynta nafaqadarrada ciyaalka oo ay bixiyeen hay'adaha Qaramada Midoobay iyo ururrada aan dawliga ahayn wuxuu badbaadiyay dad badan. Balse gargaarku ma ceeb la'ayn, oo xataa mararka qaar dhibaatooyin ayuu sababay. Warbixintu waxay sharraxaysaa wixii qabsoomay ee hagaagay iyo wixii shaqayn waayay, iyo sida hadda ka dib hawlaha gargaarka loo horumarin karo. Hoos waxaa ku qoran natiijada qiimaynta oo la soo koobay iyo talooyinkooda:

### 1. SAAMAYNTA GARGAARKA BANI'AADANNIMO:T

Gargaarku wuxuu ka hortagay macluul, wuxuuna badbaadiyay tobannaan kun ama xataa boqollaal kun oo qof. Dad badan waxay sheegeen in ay dhiman lahaayeen ama ay ku qasbanaan lahaayeen in ay barakacaan haddii aysan gargaar heli lahayn. Sidaas oo ay tahay, kaliya in xoogga la saaray gargaarka muddada gaaban ayaa sababay in dadku si dhakhsi leh u kaban waayaan, sidoo kalana dad badan ku khasbay in ay u barakacaan magaalooyinka iyaga oo gargaar raadinaya; waxayna halkaas kala kulmeen duruufo nololeed oo adag.

- **Talo:** In la isku xiro gargaarka muddada gaaban iyo qorshayaasha muddada fog, sida abuuridda shaqooyin nolol-maalmeedka lagu soo saarto iyo dhisidda guryo, si dadku ayna ugu qasbanaanin in ay u barakacaan degaan aan amni ahayn ama degaan aysan nolol hagaagsan ka suurtagalaynin.

## 2. GAARSIINTA GARGAARKA IYO AMNIGA:

Gargaarku wuxuu gaaray meelo badan oo gargaar u baahnaa oo awal hore ay adkayd in gargaar la gaarsiiyo. Balse waxaa jiray meelo kale oo ay aad u adkayd in la gaarsiiyo gargaar. Habraacyada iyo xeerarka amniga ee ad'adag ayaa sababay in shaqaalaha gargaarku ay gaari kari waayaan dadka kaalmada u baahan ama in ay tagaan meelaha ay ku nool yihiin dadka nugul.

- **Talo:** In xeerarka iyo habraacyada amniga ee Qaramada Midoobay la dabciyo si shaqaalaha gargaarku ay u gaari karaan meelo badan oo aan hadda la gaari karin.

## 3. ISKU DUWIDDA HAWLAHA HAY'ADAHA GARGAARKA :

Fikrado cusub oo la soo jeediyay oo ay ka mid yihiin in si hagaagsan loo kormeero gargaarka la bixiyay ama siyaabo cusub oo xog iyo falcelin looga soo uruuriyo bulshooyinka ay abaaruhu saameeyeen ayaa qeyb weyn ka qaatay in la hagaajiyo waxkaqabashada dhibaatooyinka bani'aadannimo. Balse kulamada badan ee u dhexeeyay hay'adaha gargaarka iyo nidaamyada lagu jahwareeraayo ayaa dib u dhigay go'aan gaarista, waqtina lumiyay.

- **Talo:** In la dhimo kulamada aan muhiimka ahayn oo la abuuro nidaam sahlan si loo qaato go'aamo loo dhan yahay oo si hagaagsanna wax looga qabto dhibaatada bani'aadannimo.

## 4. GAABISKA KA JIRA BIYAHA NADIIFKA AH IYO FAYADHOWRKA:

Gargaarka cunnadu waxa uu badbaadiyay dadka, halka kaalmada lacageed ee la siiyayna ay ka caawisay in ay ku iibsadaan waxyaabaha kale ee asaasiga ah. Diiradda lama saarin bixinta biyo nadiif ah iyo fayadhwor, taas oo ku keentay cudurro ku dhaca dadka sida shubanbiyood, gaar ahaan carruurta.

- **Talo:** In mudnaanta la siiyo biyaha nadiifka ah iyo nadaafadda si loo badbaadiyo nolosha dad badan, gaar ahaan xeryaha barakacayaasha iyo goobaha ciriiriga ah

## 5. CAAWINTA DADKA LAGA TIRADA BADAN YAHAY:

Gargaarku waxa uu gaaray dadka laga tirada badan yahay, iyadoo sababteedana ay leedahay qorshaynta wanaagsan ee la sameeyay. Gargaar bixiyayaashu diiradda ma saarin haweenka, dadka naafada ah, iyo kooxaha kale ee laga tirada badan yahay.

- **Talo:** In la maalgeliyo hay'adaha gargaarka ee Soomaalida si ay u gaaraan dhammaan qaybaha bulshada ay dhibaatadu saameysay. In si dhow loogu fiirsado cidda u shaqeysa hay'adaha caalamiga ah iyo sida looga baaqsan karo ku-tiirsanaanta beelo gaar ah.

## 6. JOOJINTA LEEXSIGA GARGAARKA:

Hay'adaha gargaarku waxay hirgeliyeen dib-u-habeyn muhiim ah si ay bixinta gargaarka uga dhigaan mid aad u hufan oo caddaalad ah, isla markaana loola dagaallamo musuqmaasuqa. In kastoo dadaalladan la sameeyay, gargaarka mararka qaarkood waa la lunsaday ama si khaldan baa loo adeegsaday, ururrada maxalliga ahina waxay dareemeen in aanan laga talagelinin go'aamada muhiimka ah.

- **Talo:** In lagala shaqeeyo hay'adaha maxalliga ah si loo joojiyo ku-takrifalka gargaarka, si hufanna loo wadaago xogta ku saabsan gargaarka la heli karo, lana abuuro nidaam lagu kalsoonaan karo oo lagu dabagalo cidda kaalmada helaysa.

## 7. ISLA-XISAABTAN:

Dhibaatooyinka qiimeyntan lagu ogaaday midkoodna ma cusba. Daraasado hore ayaa sidoo kale muujiyay caqabado kuwan la mid ah. Hay'adaha gargaarku ma laha habab wax-ku-ool ah oo ay ku hubiyaan in ay horumariyaan shaqadooda. Dadka ay dhibaatada bini'aadannimo gaartay badankoodu ma oga sida go'aamada gargaarka loo gaaro, mana laga qeybgeliyo go'aannada muhiimka ah.

- **Talo:** In la caddeeyo cidda masuulka ka ah xallinta cilladaha nidaamka gargaarka , lana xaqiijiyo in la dabagalo horumarka la sameeyay. In la caddeeyo gargaarka yaalla iyo kan la bixiyay, lana hubiyo in dadka taladooda la tixgeliyo xisaabtana lagu darsado. In bulshada si dhow looga talageliyo qorshaynta barnaamijyada gargaarka.





**CONTACT US:**

Wixii macluumaad dheeraad ah ama su'aalo ah, kala xiriir Raagsan lambarka gaaban ee 2224